# Ma xiisaynaysaa inaad u Tartanto Xafiiska Seattle?

**Isticmaal Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Vouchers) si aad u maalgeliso ololahaaga!**




## Laynka wakhtiga

**Janaayo 1, 2020**
Wareega Doorashada ayaa Bilaabma
Murashaxiinta waxay bilaabi karaan qaadashada tabarucaadka ay u qalmaan.

**Juulay 1, 2020**
Barnaamijku waxa uu u Furmaa Murashaxiinta
Murashaxiintu waxay ku ballan qaadaan inay raacaan sharciyada barnaamijka.

**Febraayo 9,2021**
Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher) waxaa boostadda loogu diri doonaa dadka degen Seattle.

**Maayo 17-21, 2021**
Murashaxiinta Todobaadka ay Wax soo gudbinayaan
Dhammaan murashaxiintu waa inay soo gudbiyaan Bayaanka Murashaxnimada ee Doorashooyinka Degmadda King.

**Juun 4, 2021**
Maalinta u dambaysa ee murashaxiinta ay geliyaan barnaamijka.

**Ogosto 3, 2021**
Doorashada Koowaad

**Noofambar 2, 2021**
Doorashada Guud

**Nala soo xidhiidh maanta tababarka qof ilaa qof ah!**
**www.seattle.gov/democracyvoucher**
**Iimaylka: democracyvoucher@seattle.gov  Telefoonka: (206) 727-8855**

**Magaalada Seattle (City of Seattle)**

**Barnaamijka** Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program)

## Sidee barnaamijkan u shaqeeyaa?

1. Seattle Ethics and Elections Commission (SEEC) waxay qaybiyaan afar Foojaro Dimuqraadiyada ah (Democracy Vouchers) oo lagu qiimeeyay $25 mid kasta dadka degen Seattle ee u qalma.
2. dadka degen waxay u qoondeeyaan foojarada musharaxiinta ka qayb galaya ee ay taageeraan.
3. SEEC waxay xaqijisaa foojarka oo waxay u soo daysaa lacag ololaha.

## Foojarada Dimuqraadiya (Democracy Vouchers) oo la jaleecayo.

Sanadka 2019 Barnaamijka Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program).

Waxaa loo qaybiyay $2,454,475 ilaa 35 olole ah.

Waxaa maaliyada lagu abaal mariyay 66% musharaxiinta ka qayb galaysa.

Waxaa la helay 147,128 foojari ah oo ka yimid 38,092 oo dadka Seattle degen ah.

## Noqo Musharax

1. Qabso jadwalka tababarka hal ilaa hal ah.
2. Ku ballan qaad inaad noqoto Murashaxa Foojarada Dimuqraadiyada (Democracy Voucher).
3. U qalan barnaamijka si aad maalgelinta u hesho.
4. Soo qaado Foorajarada Dimuqraadiya (Democracy Vouchers) ka yimid dadka degen Seattle.

$ Maalgeli ololahaaga!

## Su`aalaha Inta badan la Isweydiiyo

**Imisa maalgelin ah ayaa loo heli karaa musharaxiinta?**

Ilaa doorashada 2021, $6.8 malyan waxaa loo heli karaa musharaxiinta si loo maalgeliyo ololahooda.

**Boosaskeed u qalma maalgelinta?**

Duqa magaalada, qareenka magaalada, iyo labba boos gollaha magaalada ah waxay u qalmi doonaan maalgelinta Foojarka Dimuqraadiyada*Democracy Voucher).

**Waa maxay xadadka ololaha ee musharaxiinta ka qayb qaadanaya barnaamijka?**

| | Duqa Magaalada | Gollaha Degmadda Magaalada (magaalada oo dhan) | Qareenka Magaalada |
|---|---|---|---|
| **Doorashada Koowaad** | $400,000 | $ 187,500 | $ 187,500 |
| **Doorashada Guud** | $800,000 | $ 375,000 | $ 375,000 |

**Sidee murashaxu ugu qalmaa barnaamijka?**

Murashaxiintu waa inay ka soo ururshaan tiro gaar ah oo tabarucaad loo qalmo ah iyo saxeexyada looga qalmo dadka degen Seattle si ay u helaan maalgelinta.

**Sideen baan u bilaabaa?**

La xidhiidh Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyada (Democracy Voucher Program) si aad u qabsato ballanka tababarka hal qof ilaa hal ah!

